

Wargeyska Mountain View

Abriil 13, 2016

Arbaco, Abriil 13.....Jilidda Dheesha "Waan Samayn Karaa" Darjada Shanaad
Talaado, Abriil 19.....Diiwaan Gelinta Isu Diyaarinta Xanaanada Kuleylaha
Qamiis, Abriil 21.....Guddiga Bulsahda Dugsiga, 3:15 p.m.
Talaado, Abriil 26.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, 8:15 a.m.

Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Macmacaanka waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Abriil 26, marka ay tahay 8:15 a.m. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Ardayda Darajada Afaraad Mountain View Waxay Ku Guuleysteen Abaal Marinta Tartanka Cesar Chavez

Ardayda Mountain View waxay ka qeybgaleen Tartanka Cesar Chavez ee Dugsiga Dagmada Salt Lake City 2016. Labada qeyb ay ardayda ku tartameen waxay ahayeen fanka la daawado iyo fanka luqadda. Qeyb kasta, garsooreyaasha dagmada waxay doorteen ardayga ku guuleystay abaal marrinta sare iyo dhowr arday kale oo ku guuleystay heerka darajada. Dugsiga Dagmada, ardayga ku guuleystay abaal marrinta sare ee fanka luqadda waxay ahayd ardayadana Lupita Robles! Waxaa abaal marrinteeda lagu siiyay casho uu soo diyaariyay Ururka Utah La Raza (Utah Coalition of La Raza) (UCLR), waxaana lagu soo dhaweyay sacab marka la akhriyay in ay soo gashay martida. Kuwa kale ee ku guuleystay fanka luqadda waxaa ka mid ah:

Booska 1 ^{aad}	Belcy Penate
Booska 2 ^{aad}	Valeria Flores
Booska 3 ^{aad}	Fatima Beltran-Diaz
Mudnaanta Sharafta	Julian Darius Hayden

Kuwa ku guuleystay fanka la daawado waxaa ka mid ah:

Booska 1 ^{aad}	Citlaly Lopez
Booska 2 ^{aad}	Merali Salgado
Booska 3 ^{aad}	Carlos Peña
Mudnaanta Sharafta	Vianka Bermudez
Mudnaanta Sharafta	Elmabel Marin
Mudnaanta Sharafta	Alan Castillo

Habeenka Sayniska

Waxaan rabnaa in aan u mahad celino dhamaan inta timid ee ka soo qeybgashay carwada sayniska todobaadkii la soo dhaafay. Waxaan si gaar ah ugu mahad celineynaa dhamaan macalimiinta iyo shaqaalaha surtogeliyay in lagu guuleystay. Waad ku mahadsan tahiiin xilka aad iska saarteen. Ardayda iyo qoysaska waxay barteen iyo waxay qaateen waqti wanaagsan!